**Jabsashadii xogta ee lagu qaadday magaalada Helsinki waxaay muujinaysaa in weerarada jabsashada xogtu ay keeneen baahi ah in qaabab cusub ay ka sameystaan adeegyada dowaladdu dhanka diyaargarowgooda, isgaarsiintooda iyo ka hortaago weerarrada jabsashada xogta.**

Golaha dowladda ayaa bishii Luulyo ee 2024 u magacaabay Xarunta Baaritaanka Shilalka (OTKES) koox baaritaan oo madax-bannaan si ay u baaraan jabsashadii xogta ee lagu qaadday magaalada Helsinki gugii 2024. Dadka uu saameeyay weerarka jabsashada xogtu waxaa la qiyaasaa inay yihiin qiyaastii 300,000 qof, taasoo macnaheedu waa in jabsashadan xogtu ay ahayd middii ugu balaadhnayd ee Finland soo marta. Kooxda baaritaanka waxay dhammeeyeen baaritaanka amniga, warbixinta baaritaankana waxaa loo gudbiyay Golaha dowladda 17.6.2025.[1]

Fal-dambiyeedyada shabakadaha xogta lagu qaadayo waa nooc ka mid ah fal-dambiyeedyada oo sii kordhaya waxyeellada ka dhashaana ay yihiin kuwo culus, gaar ahaan marka lagu jiro xaaladdan hadda jirta ee halisyada haybridhka ah. Maamulka dadweynuhu waxa uu u yahay bartilmaameed xiiso gaar ah u leh dambiileyaasha taas oo ay sababtay noocyadda iyo cadadka xogta uu hayo. Laamaha adeegyada guud weli waxaay u baahan yihiin horumarin dhinaca ka hortagga khataraha fal-dambiyeedyada shabakadaha xogta, maadaama hababka lagu ogaado weerarrada iyo nuglaanta loo leeyahay aysan ahayn kuwo si baaxad leh loo isticmaalo.

Maamulka dadweynaha maareynta xogtiisa, amniga xogta iyo ilaalinta xogta waxaa haga hay'ado kala duwan oo badan. Hay'adahani waxay hagitaankaas u fuliyaan si madax-bannaan, iyagoo ku saleynaya ujeedooyinka shaqadooda gaarka u ah. Hagista ay helaan cutubyada maareynta xogtu waa mid kala firdhisan, waxaana dhab ahaan kala duwanaata siyaabaha loo dabaqo xeerarka iyo tilmaamaha. Intaa waxaa dheer in shaqada ay hay'adahu qabtan tahay hagis, laakiin hay'adaha waxqabadka ka mas'uulka ah kormeerkoodu uu yaryahay. Si kastaba ha ahaatee, maareynta wareegga jiritaanka xogtu waa mid muhiim ah marka la eego amniga xogta iyo ilaalinta xogta. Laamaha adeegyada guud ee loogaga jawaabo khataraha shabakadaha xogta waxaa lagu xoojin karaa hormarinta iyo ballaarinta hababka lagu ogaado weerarrada iyo nuglaanta.

*"Diyaargaroobka dhacdooyinka sida jabsashada xogta iyo ka hortagooda waxay keeneen xaalad cusub oo siyaabo badan marka loo fiiriyoba: Finland dhaqan ahaan waxaay caado u lahayd iskaashiga hay'adaha dowliga. Dhacdooyinka saybar-ka tallaabooyinka ka hortagga ah waa kuwo la kala qaybiyay. Isla markaana baarista iyo maareynta kiisaska jabsashada xogtu waxay aad ugu xiran tahay khibradda iyo helitaanka waxqabadka adeegbixiyeyaasha laamaha adeegga guud. Tusaale ahaan waxqabadka iskaashiga sida waxqabadka SAR[2] laguma qeexin qaab waxqabad oo khuseeya kiisaska jabsashada xogta. Wax badan oo waxa jira uu mas'uul ka ahaanayo dhibbanuhu. "* Sida aay sheegtay hoggaamiyaha kooxda baaritaanka Hanna Tiirinki.

*”Qeexitaanka dhibbanuhu laftiisa ayaa u baahan in dib looga fikiro. Inagoonan u fiirsanin ayaan ku dhawaad maalin walba u isticmaalnaa adeegyo iyo nidaamyo xog lagu ururiyo. Maamulka deegaanku wuxuu haystaa macluumaad shakhsi oo kala nooc ah oo inaga saabsan. Dhacdooyinka saybar-ka weeraruhu wuxuu karaa inuu kaydiyo xog aad u badan oo uu mar dambe isticmaalo. Xogta isku kala nooca ah ayaaba nuglaanta keenaysa marka laga fiiriyo dhanka dhibbaneyaasha. Jabsashada xogta weligeed waa in loo aqoonsadaa khatarta ah in xogta mar dambe loogu isticmaali karo ujeedooyin waxyeello leh, sida xatooyada aqoonsiga iyo khiyaanada tusaale ahaanna da'yartu ma awoodaan inay*

---

[1] Baaritaanka dhacdooyinka caadada ka baxsan waa mid sida uu sharcigu dhigayo khuseyso dhacdo daran oo keeni karta dhimasho ama in ay halis galaan ama si daran u dhaawacmaan waxqabadyada bulshadu, taas oo aan ahayn shil.
Sharciga baadhitaanka ammaanka 525/2011.
[2] Search and Rescue, raadinta iyo badbaadinta.

*ka fikiraan xogtooda waxa ku dhici kara, marka ay qaan gaaraan", ayaay ku sii daraysaa hadalkii hore Tiirinki.*

Sharciga qaran ee Amniga Saybar-ku wuxuu dhaqan galay 8.4.2025. Fulinta qaranka ee amarka rasmiga ah ee Shabakadda iyo Amniga Xogta NIS2, waa qayb ka mid ah fulinta Sharciga Amniga Saybar-ka. Si kastaba ha ahaatee degmooyinka iyo magaalooyinka Finland waxaay leeyihiin ismaamul ballaadhan, mana gaadho degmooyinka iyo magaalooyinka Amarka rasmkiga ah ee amniga saybar-ka NIS2.

"*Amarka qaran ee NIS2 ma gaadhsana maamulka deegaanka ee Finland. Taloooyinka aan ku bixinay baaritaanka waxaan hadda ku dadaalaynaa inaan buuxino god daloolkaas,"* ayaay Tiirinki ku dartay hadalkeedii hore.

NIS2 wuxuu saarayaa hay'adaha waajib isgaarsiineed oo 24-saacadood ah. Kiisaska jabsashada xogta isgaarsiintu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah tallaabooyinka ilaalinta. Isgaarsiintu waxaay yareeynaysaa kalsooni darrada, waxaay ka hortagaysaa faafitaanka macluumaadka khaldan waxaayna xaqiijinaysaa in dhibbaneyaashu ay helaan taageerada ay u baahan yihiin. Helitaanka isgaarsiinta, baaxaddeeda iyo in la fahmi karo ayaa ah arrimaha leh mudnaanta koowaad.

"*Sidoo kale tusaale ahaan carruurta iyo dhallinyaradu marka ay yihiin kooxda la damacsanyahay in xogta la gaadhsiiyo waa in isgaarsiinta loogu diyaariyaa qaab da'dooda lagu tixgalinayo. Isgaarsiinta xaaladaha cakiran iyo xaaladaha dhibaatooyinka waxaa ka mid ah in inta badan in xogta la hayaa ay tahay mid dhiman oo aan dhameystirnayn, sababta oo ah xogta iyo sawirka xaaladda laga haystaa waa mid marba marka ka dambeysa sii buuxsamaya. In xogta la hayaa aynan ahayn mid dhameystiran ma aha inay noqoto caqabad joojinaysa isgaarsiinta iyo warbaahinta",* ayaay hadalkeeda ku sii adkeyneysaa Tiirinki.

"*Waxaa wali mudan in la sheego, in waxqabadka adeegyada hay'adaha ka mas'uulka ka ah ay yihiin kuwo aad u kala duwan, mana aha kuwo lays barbar dhigi karo. Qaarkood waxay u diyaargaroobeen si aad u fiican - kuwa kalena weli waxaay u baahan yihiin inay soo gaadhaan. Finland isbarbardhigyada caalamiga ah si fiican ayaay ugu guulaysataa isbarbardhigga dhanka diyaargarowga diyaargaroobka. Jabsashada xogtuna waxaay sidoo kale keentay in si fiican loogu soo jeesto dhibaatada, waxaana la bilaabay in wax laga qabto oo la saxo. Taas macnaheedu waa in wax badan imikaba laga qabto ka hor tagga iyo la dagaalanka xaaladaha jabsashada xogta u dhigma"* , ayaay hadalkeeda ku sii adkeyneysaa Tiirinki.

Baaritaanka waxaa lagu bixinayaa afar talo. Waxay ku beeganyihiin ugu horrayn Wasaaradda maaliyadda, taasoo mas'uul ka ah fulintooda iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda caddaaladda, Wasaaradda gaadiidka iyo isgaarsiinta, Maamulka waxbarashada iyo Iskutagga degmooyinka. Intaa waxaa dheer in talooyinku ay khuseeyaan isku dubba rididda maamulka xogta, kormeerkiisa iyo hagitaankiisa. Intaas waxaa sii dheer in taloooyinka wax lagaga qabanayo god daloolada ammaanka xogta ee maamulka dadwaynaha iyo sii horumarinta awooddiisa, si god daloolada ammaanka xogta loo ogaado oo loo hagaajiyo.

Faallada hay'adda qaranka ee ammaanka xogta:

**Xarunta ammaanka sayber-ka (KTK): "***"Annaga oo ah hay'adda qaran ee amniga xogta waxaan caawinaa oo aan la talinaa shirkadaha, hay'adaha dowliga iyo muwaadiniinta si ay uga diyaargaroobaan oo u aqoonsadaan khataraha saybar-ka ee hadda jira iyo kan mustaqbalka. Xarunta amniga saybar-ka ee Traficom waxay si buuxda u taageertay magaalada Helsinki illaa markii la ogaaday*

*ogaanshaha jabsashada xogta waxaanan sii wadaynaa iskaashiga aan la leenahay magaalada iyo bixiyeyaasha adeegyada kala duwan ee kale,*" ayuu yiri agaasimaha Samuli Bergström ee  Xarunta amniga saybar-ka ee Traficom. *""Weerarka saybar-ka muhiimadda isgaarsiintu ay leedahay way sii korodhaa. Warbixinta ay Traficom soo saartay gugii 2025 ee ku magac baxay Sidee looga warramaa weerarrada saybar-ka, waxaa lagu sheegayaa noocyada kala duwan ee weerarrada saybar-ka iyo hababka iyo nidaamyada ay dembileyaashu adeegsadaan. Intaa waxaa dheer tilmaamahaas in lagu bixinayo talooyin la xidhiidha dhinaca ka diyaargarowga isgaarsiintaa iyo isgaarsiinta wakhtiga lagu jiro weerarka saybar-ka iyo wakhtiga ka dambeeyaba." ayuu sheegay* Bergström isaga oo hadalkiisa sii watay.

Baadhitaanada kale ee la xidhiidha jabsashada xogta ee magaalada Helsinki:

**Laanta dambibaarista dhexe ee booliska (KRP):** Baaritaanka hore ee jabsashada xogta ee magaalada Helsinki waxaa mas'uul ka ah Laanta dambibaarista dhexe ee booliska. Jabsashada xogta waxaa loo baarayaa iyadoo lagu qiimeynayo fal jabsasho xog ah oo daran. Intaa waxaa dheer in KRP ay ku baarayaan baaritaanka hore in magaaladu si habsami leh u ilaalisay xogta. Baaritaankan magaca fal-dambiyeedku waa shaki fal-dambiyeed oo jabsasho xog la xidhiidha.

**Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta (TSV)** ayaa baaraya dhaawaca ammaanka xogta ee ku saabsan macluumaadka shakhsiga ah marka loo eego dhaqanka sharciga ilaalinta xogta. Baarista waxaa si gaar ah lagu qiimeynayaa in magaalada Helsinki ay isticmaashay tallaabooyinka ilaalineed oo ku filan iyo in ay in ku filan ka warhaysay magaaladu danaha dadka jabsashada xogta dhibbane u noqday iyo xuquuqdooda. Baaritaanku waa mid wali socda, waxaana hadda lagu qiimeynayaa sharraxaadda laga helay magaalada Helsinki ee ku saabsan arrinta dhacday.

Halkee caawimaad laga heli karaa?

**Heeganka dhibbaneyaasha fal-dambiyeedyada (RIKU)** waxaay boggooda ku soo saareen talooyin loogu talagalay dadka dhibbaneyaal u noqday jabsashada xogta ama faafinta xogta. Bogga waxaa lagu xoojinayaa in ay muhiim tahay in la raaco tilmaamaha hay'adaha dowliga ah oo la qaado tallaabooyinka xirista ah ee lagama maarmaanka ah, si macluumaadka shakhsiga ah aan loogu isticmaalin khiyaano. RIKU waxay sidoo kale bixisaa caawimo wada sheekeysiga ah. Adeegyadu waa bilaash.

**Macluumaad dheeraad ah:**

Hoggaamiyaha kooxda baaritaanka Hanna Tiirinki, tel. 02951 50747, magacahore.magacaqoyska@om.fi

Intaas waxaa dheer tel.  02951 50738 ama 050345 1931. Baaritaankan laynka taleefanka ee loo soo furay wuxuu furnaanayaa illaa 1.8.2025.

1.8. wixii ka dambeeya waxaan idinka codsanaynaa in su'aalaha macquulka ah ee aad qabtaan aad ku soo dirtaan cinwaanka iimaylka ee viestinta.otkes@om.fi ama aad toos ugu dirtaan hoggaamiyaha kooxda baaritaanka.